


Macluumaadka xiriirka

Hawl-wadeenada gaadiidka iskoolka ee Dhismaha bulshada

0155 - 24 83 90

skolskjuts@nykoping.se



Nyköping waxay ku taalaa xeebta oo hal saacad koonfur ka xigtaa Stockholm. U dhawaanshaha xeebta, calaamad maxali ah iyo gaarida magaaloyinka waaweyn ee Yurub waxay ku siinayaan fursadaha inaad ku neefsato oo ku korto.

Gaadiidka iskoolka ee ardayda dugsiga hoose-dhexe iyo ardayda dugsiga gaarka ee caruurta laxaadkoodu kala dhantaalanyahay ee gudaha degmada Nyköping.

Arday wuxuu bilaa kharash ku heli karaa (bilaash) gaadiidka iskoolka haddii ardaygu

- ku jiro diiwaan-gelinta deganaanshaha gudaha degmada Nyköping.
- ka diiwaan-gashanyahay iskoolka degmadu siisay (iskoolka meelaynta aasaasiga ah) ama ka diiwaan-gashanyahay iskool la doortay gudaha degmada taas oo gaadiidka iskoolka ee degmada aanu ka kharash badnayn inta uu noqon lahaa ka iskoolka la siiyay.
- Buuxiyay mid ka mid ah shuruudahan soo socda, masaafo dheer, xaalada taraafikada wadooyinka, hoos u dhac awooda laxaadka ah ama xaalad kale oo gaar ah.

Go'aamada masaafada (xadyada kiilomitir)

Si arday xaq ugu yeesho gaadiidka iskoolka oo ay sabab u tahay dariiq dheer ilaa iskoolka waa in masaafada u dhaxaysa guriga (cinwaanka laga diiwaan-gashanyahay) iyo iskoolka la siiyay (iskoolka meelaynta aasaasiga ah) ay ka badantahay:

- 3 km dhanka fasalada F - 3
- 4 km dhanka fasalada 4 - 6
- 5 km dhanka fasalada 7 – 9
- 6 km dhanka dugsiga sare ee caruurta laxaadkoodu kala dhantaalanyahay

Yaa u baahan codsiga gaadiidka iskoolka?

- Dhamaan ardayda xaq u leh gaadiidka iskoolka sida ku cad go'aamada masaafada, laakiin sabab jirta awgeed aan raaci karin bas laakiin taas badelkeeda u baahan inay raacaan tagasi.
- Dhamaan ardayda u baahan gaadiidka iskoolka iyadoo ay sabab u tahay xaalada taraafikada wadooyinka, hoos u dhac awooda laxaadka ah oo la cadeeyay ama xaalad kale oo gaar ah.
- Dhamaan ardayda leh hoy isbadala (50/50)

Qofkee ayaan u baahnayn inay codsadaan gaadiidka iskoolka?

- Ardayda heshay casuumada ku saabsan gaadiidka iskoolka sida ku cad [go'aamada masaafada](#) ma u baahna inay sameeyaan codsi laakiinse waxa keliya waa in HAA lagaga jawaabo casuumadan. Jawaabta waa in loo diro skolskjuts@nykoping.se ugu dambeyn 15-ka Abriil.
- Ku codso dhanka adeega elaktarooniga ah (Bank-ID) kaas oo aad ka helayso www.nykoping.se/skolskjuts.
- Codsiga cusub waa in la sameeyo ka hor sanad-dugsiyeed kasta oo cusub maadaama go'aankan ku saabsan gaadiidka iskoolka la gaaro calaa sanad-dugsiyeed ahaan ugu badnaan hal sano.

Akhri dheeraad ku saabsan nidaamyada iyo qawaaniinta

Adigu waxaad warbixin dheeraad ah ka helayso www.nykoping.se/skolskjuts. Nidaamyadu waa kuwa la go'aamiyay siyaasad ahaan oo waxay aasaas u yihiin dhamaan go'aamada ay gaaraan hawl-wadeenada gaadiidka iskoolka ee degmada.